

# Raadraaca Xiriirka

Macluumaadka Caafimaadka Dadweynaha ee Qarsoodiga ah


## Waa maxay Raadraacida Xiriirka?

Raadraacida Xiriirka waa geedi-socod ay u isticmaasho Waaxda Kentucky Caafimaadka Dadweynaha Si gacan looga geysto joojinta faafitaanka cudurada sida COVID-19.


**Hadafka:** Jooji faafitaanka cudurka oo Badbaadi Noolal



Shaqaalaha Caafimaadka Dadweynaha waxay la xiriiraan shakhsiyaadka kuwaas oo qaaday cudurka COVID-19 si ay u qiimeeyaan xaaladooda oo ay **u raadraacaan wixii u dhowaansho qofeed ah.**



Dadka raadraaca ah waxay la xiriirayaan xiriirada la aqoonsaday si ay **u siiyaan tilmaamo iyo si ay ugu xiraan kheyraadka deegaanka.**



Iyadoo **la raacayo tilmaamaha** uu bixiyey qofka Raadraaca ah, xiriirada waxay gacan ka geysanayaan **joojinta faafitaanka cudurka safmareenka** ee COVID-19 iyo **badbaadinta noolasha dadka ku nool Kentucky.**

**Isdeji oo Isqaabeey Marka Hore**



Isdeji, ahaaw mid xasilloon, oo xaadir ah si aad gacan uga geysato inaad abuurto xaalad togan oo adiga dan kuu ah iyo ku soo wacaha

**Marka Hore Raadi Inaad Wax Fahamto Kadibna in Lagu Fahmo**



Noqo qof dhageysigiisu fiican yahay si aad u fahamto waxa qofka ku soo wacay uu u baahan yahay; tani waxay kaa caawinaysaa inaad u caawiso qofka ku soo wacay si dhakhso ah oo wax ku ool ah

**Oggolow Sida ay Dadka Dareemaan**



Fahmida xaalada qofka ayaa ka caawin karta soo wacaha inuu isdejiyo waxayna taasi fududeynaysaa xiisada ka jirta labada dhinac ee taleefanka

**Ku Caawi Dadka Inay Helaan Xulashooyin**



Soo wacaha waxaa laga yaabaa inuusan arkin dhamaan waxyaalaha suurtagalka ah waxaana ka sii fudud inaad adiga siiso arigtiyo kala duwan

**U Oggolow Xulasho**



Dadka waxay dooran doonaan waxay u malaynayaan inay u fiican yihiin, qof kale go'aanadiisana ma aha kuwo adiga kaa turjuma ama kuwo ka turjuma shaqadaada